

**XAASHIDA MACLUUMAADKA EE LOOGU TALAGALAY DADKA LA
TALLAALYO IYO DARYEELAYAASHA
FASAXIDA ADEEGSIGA DEGDEGGA AH (EUA) EE
TALLAALKA COVID-19 EE MODERNA EE LAGAGA HORTAGGO CUDURKA
KORONA-FAYRAS 2019 (COVID-19) LOOGUNA TALAGALAY SHAKHSIYAADKA
DA'DOODU TAHAY 18 SANNO JIR AMA WIXII KA WEYN**

Waxaa lagu siinayaa tallaalka COVID-19 ee Moderna si looga hortaggo Cudurka Korona-fayras 2019 (COVID-19) ee uu dhaliyo SARS-CoV-2. Xaashidan Macluumaadku waxay ka kooban tahay macluumaad kaa caawinaya inaad fahamto khataraha iyo faa'iidooyinka Tallaalka COVID-19 ee Moderna, kuwaas oo laga yaabo inaad hesho maxaa yeelay hadda waxaa jirta aafadda COVID-19.

Tallaalka COVID-19 ee Moderna waa tallaal wuxuuna kaa ilaalin karaa inuu kugu dhaco COVID-19. Ma jiro tallaal ay ansixiyeen Maamulka Cuntada iyo Dawooyinka ee Mareykanku (FDA) oo lagaga hortaggo COVID-19.

Akhriso Xaashidan Macluumaadka si aad u hesho xog ku saabsan tallaalka COVID-19 ee Moderna. La hadal bixiyaha tallaalka haddii aad su'aalo qabto. Adiga ayaa iska leh ikhtiyaarka qaadashada Tallaalka COVID-19 ee Moderna .

Tallaalka COVID-19 ee Moderna waxaa lagu bixiyaa qaab taxane oo 2-qaadasho ah oo ay dhaxeysa muddo 1 bil ah, waxaana lagu mudaa muruqa.

Tallaalka COVID-19 ee Moderna ayaa laga yaabaa inuusan difaacin qof walba.

Waxa suurogal ah in Xaashidan Macluumaadka la cusbooneysiisay. Si aad u hesho Xaashida Macluumaadka ee ugu dambeysay, fadlan booqo www.modernatx.com/covid19vaccine-eua.

MAXAAD U BAAHAN TAHAY INAAD OGGAATO KAHOR INTA AADAN QAADAN TALLAALKAN

WAA MAXAY COVID-19?

Cudurka COVID-19 waxaa sababa korona-fayras loo yaqaano SARS-CoV-2. Noocan korona-fayraska ah horey looma arag. Waxaad ku qaadi kartaa COVID-19 taabashada qof kale oo qaba fayraska. Waa cudur inta badan ku dhaca nidaamka neefsashada oo saameyn ku yeelan kara xubnaha kale. Dadka qaba COVID-19 waxay soo sheegeen astaamo kala duwan, oo isugu jira astaamo khafiif ah illaa jirro daran. Astaamaha waxaa la isku isku arki karaa 2 ilaa 14 maalmood kadib marka uu kugu dhaco fayrasku. Astaamaha waxaa ka mid noqon kara: qandho ama qarqaryo; qufac; neef qabatin; daal; murqo ama jir xanuun; madax xanuun; luminta dhadhanka ama urta oo cusub; cune xanuun; sanko oo cabudhsama ama sanko oo dareera; lallabbo ama matag; shuban.

WAA MAXAY TALLAALKA COVID-19 EE MODERNA?

Tallaalka Covid-19 ee Moderna waa tallaal aan la ansixin oo ka hortaggi kara COVID-19. Ma jiro tallaal ay ansixisay FDA oo lagaga hortaggo COVID-19.

Waxa wax laga beddelay: 12/20201

FDA waxay fasaxday adeegsiga degdegga ah ee Tallaalka COVID-19 ee Moderna si looga ilaaliyo COVID-19 shakhsiyaadka jira 18 sanno jir iyo wixii ka weyn, kaas oo hoos yimaada Fasaxida Adeegsiga Degdegga ah (EUA).

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan EUA, fiiri qeybta “**Waa maxay Fasaxida Adeegsiga Degdegga ahi (EUA)?**” ee ku taala dhammaadka Xaashidan Macluumaadka.

MAXAA WAAJIB AH INAAD U SHEEGTO BIXIYAHAAGA TALLAALKA KAHOR INTA AADAN QAADAN TALLAALKA COVID-19 EE MODERNA?

U sheeg bixiyahaaga tallaalka dhammaan xaaladahaaga caafimaad, kuwaas oo ay kamid yihiin haddii aad:

- leedahay wax xasaasiyado ah
- leedahay qandho
- leedahay cillad dhiig-bax ama aad adeegsatid dhiig khafiifiye
- leedahay cillada nidaamka difaaca jirka ama aad qaadatid daawo saameyn ku leh nidaamka difaaca ee jirkaaga
- leedahay uur ama qorsheynayso inaad uur yeelato
- naas-nuujinayso
- qaadatay tallaalka kale oo COVID-19 ah

YAA QAADANAYA TALLAALKA COVID-19 EE MODERNA?

FDA waxay fasaxday adeegsiga degdegga ah ee Tallaalka COVID-19 ee Moderna ee loogu talagalay shakhsiyaadka jira 18 sanno jir iyo wixii ka weyn.

CIDEE AYAAN QAADAN KARIN TALLAALKA COVID-19 EE MODERNA?

Waa inaad qaadan Tallaalka COVID-19 ee Moderna haddii aad:

- xasaasiyad daran kala kulantay qaadasho hore (previous dose) oo tallaalkan ah
- xasaasiyad daran ka qaaday mid kamid ah waxyaabaha uu tallaalkani ka kooban yahay

WAA MAXAY WAXYAABAHU UU KA KOOBAN YAHAY TALLAALKA COVID-19 EE MODERNA?

Tallaalka COVID-19 ee Moderna wuxuu ka kooban yahay waxyaabahan soo socda: messenger ribonucleic acid (mRNA), lipids (SM-102, polyethylene glycol [PEG] 2000 dimyristoyl glycerol [DMG], cholesterol, and 1,2-distearoyl-sn-glycero-3-phosphocholine [DSPC]), tromethamine, tromethamine hydrochloride, acetic acid, sodium acetate, and sucrose.

QAABKEE LOO QAATAA TALLAALKA COVID-19 EE MODERNA?

Tallaalka COVID-19 ee Moderna ayaa lagugu siin doonaa qaabka mudida (durida) muruqa.

Tallaalka COVID-19 ee Moderna waa taxane 2 qaadasho ah oo ay dhaxeeyso muddo 1 bil ah.

Haddii aad hesho hal qaadasho oo ah Tallaalka COVID-19 ee Moderna, waa inaad heshaa qaadasho labaad oo isla tallaalkan ah 1 bil kadib si loo dhammeystiro taxanaha tallaalka.

MIYAA HORE LOO ADEEGSADAY TALLAALKA COVID-19 EE MODERNA?

Tallaalka Covid-19 ee Moderna waa tallaalka aan la ansixin. Tijaabooyinka caafimaad [ee la sameeyay], ku dhowaad 15,400 oo qof oo 18 sanno jir ah ama ka weyn ayaa qaatay ugu yaraan 1 qaadasho oo ah tallaalka COVID-19 ee Moderna.

WAA MAXAY FAA'IIDOOYINKA TALLAALKA COVID-19 EE MODERNA?

Tijaabo caafimaad oo socota, Tallaalka COVID-19 ee Moderna ayaa muujiyay inuu ka hortaggo COVID-19 marka la qaato 2 jeer oo 1 bil u dhaxeeyso. Muddada uu qofka ka difaaciyo COVID-19 hadda lama ogga.

WAA MAXAY KHATARAHA TALLAALKA COVID-19 EE MODERNA?

Waxyeellooyinka weheliya Tallaalka COVID-19 ee Moderna ee lasoo sheegay waxaa ka mid ah:

- Falcelinta goobta muditaanka: xanuun, damqasho iyo barar qanjidhada yaryar ee isla dhinaca gacanta la muday, barar (adkaansho), iyo guduudasho.
- Waxyeellooyinka guud ee weheliya: daal, madax xanuun, murqo xanuun, xanuunka kala-goosyada, qarqaryo, lallabbo iyo matag, iyo qandho

Fursadda uu Tallaalka COVID-19 ee Moderna ku sababi karo xasaasiyad daran aad ayay u yar tahay. Xasaasiyada darani waxay badanaa dhacdaa daqiiqado gudahood illaa hal saac kadib qaadashada Tallaalka COVID-19 ee Moderna. Sababtaas awgeed, bixiyahaaga tallaalka ayaa kaa codsan kara inaad joogtid goobta aad ka qaadatay tallaalkaaga si xaaladaada loola socdo tallaalka ka dib. Calaamadaha xasaasiyada daran waxaa ka mid noqon kara:

- Neefsashada oo adkaata
- Bararka wejigaaga iyo cunahaaga
- Wadne garaac degdeg ah
- Firiiric daran oo jidhkaaga oo dhan ka soo baxa
- Dawakhaad iyo daciifnimo

Waxa suurogal ah in kuwani aysan ahayn dhammaan waxyeellooyinka weheliya Tallaalka COVID-19 ee Moderna. Waxyeellooyin weheliya oo daran oo lama filaan ah ayaa dhici kara. Tallaalka COVID-19 ee Moderna wali tijaabooyin caafimaad ayaa lagu daraaseynayaa.

MAXAAN KU SAMEEYAA WAXYEELLOOYINKA WEHELIYA?

Haddii aad isku arragto xasaasiyad daran, wac 9-1-1, ama tag cisbitaalka kuugu dhow.

Wac bixiyaha tallaalka ama bixiyaha daryeelka caafimaadka haddii aad qabtid waxyeellooyin weheliya oo ku dhibaya ama haddii aysan baabi'in.

U sheeg waxyeellooyinka weheliya **Nidaamka Ka Warbixinta Dhacdada Daran ee Tallaalka (VAERS) ee FDA/CDC**. Lambarka wicitaankiisu bilaashka yahay ee VAERS waa 1-800-822-7967 ama ku soo gudbi warbixinta onlayn <https://vaers.hhs.gov/reportevent.html>. Fadlan ku dar "Moderna COVID-19 Vaccine EUA" sadarka koowaad ee sanduuqa #18 ee foomka warbixinta.

Intaas waxaa dheer, waxaad waxyeellooyinka weheliya tallaalka ugu soo gudbin kartaa ModernaTX, lambaradan 1-866-MODERNA (1-866-663-3762).

Waxaa kale oo lagu siin karaa ikhtiyaar aad iskaga diiwaangeliso **v-safe**. **V-safe** waa qalab ikhtiyaari ah oo cusub oo lagu shubto taleefanka casriga ah oo adeegsada farriimaha qoraalka iyo sahaminta internetka si loola socdo xaaladda dadka la tallaalay loona aqoonsado waxyeellooyinka weheliya ee dhalan kara kadib tallaalka COVID-19. **V-safe** wuxuu weydiiyaa su'aalo ka caawiya CDC la socoshada badbaadada tallaalada COVID-19. **V-safe** sidoo kale wuxuu bixiyaa xasuusinta qaadashada labaad haddii loo baahdo iyo dabagalka tooska ah ee taleefanka ee ay CDC sameyso haddii ka qeybqaatayaashu soo sheegaan saameyn caafimaad oo weyn kadib tallaalka COVID-19. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan sida la isku diiwaangeliyo, booqo: www.cdc.gov/vsafe.

KA WARAN HADDII AAN GO'AANSADO IN AANAN QAADAN TALLAALKA COVID-19 EE MODERNA?

Adiga ayaa iska leh ikhtiyaarka qaadashada ama diidmada Tallaalka COVID-19 ee Moderna. Haddii aad go'aansato inaad qaadan, waxba kama beddeli doonto daryeelkaaga caafimaad ee caadiga ah.

MIYAY JIRAAN XULASHOYIN KALE OO LAGAGA HORTAGGI KARO COVID-19 OO AAN AHAYN TALLAALKA COVID-19 EE MODERNA?

Wakhtigan xaadirka ah, ma jiro tallaalka kale oo la ansixiyay lana heli karo oo lagaga hortaggo COVID-19. Tallaalka kale ee lagaga hortaggo COVID-19 ayaa lagu heli karaa Fasaxida Adeegsiga Degdegga ah.

TALLAALKA COVID-19 EE MODERNA MA LA QAADAN KARAA TALLAALADA KALE?

Ma jirto wax xog ah oo ku saabsan wada adeegsiga Tallaalka COVID-19 ee Moderna iyo tallaallada kale.

MAXAA DHACAYA HADDII AAN UUR LEEYAHAY AMA AAN NAAS-NUUJINAYO?

Haddii aad uur leedahay ama aad naas-nuujinayso, kala hadal xulashooyinkaaga bixiyahaaga daryeelka caafimaad.

TALLAALKA COVID-19 EE MODERNA MIYUU I QAADSIIN DOONAA COVID-19?

Maya. Tallaalka COVID-19 ee Moderna kama koobna SARS-CoV-2 kumana qaadsiin karo COVID-19.


HEYSO KAARKAAGA TALLAALKA

Markaad hesho qaadashadaada ugu horreysa, waxaad heli doontaa kaarka tallaalka kaas oo ku tusaya goorta aad u soo noqonayso qaadashadaada labaad ee tallaalka COVID-19 ee Moderna. Xusuusnow inaad soo qaadato kaarkaaga marka aad soo noqonayso.

XOG DHEERAAD AH

Haddii aad su'aalo qabtid, booqo bogga internetka ama wac lambarka taleefanka ee hoos ku qoran.

Si aad u hesho Xaashiyaha Macluumaadka ee ugu dambeeyay, fadlan sawir koodka QR ee hoos ku yaala.

Bogga internetka ee Tallaalka COVID-19 ee Moderna	Lambarka taleefanka
<p>www.modernatx.com/covid19vaccine-eua</p> 	<p>1-866-MODERNA (1-866-663-3762)</p>

SIDEE AYAAN WAX BADAN KU OGGAAN KARAA?

- Weydii bixiyaha tallaalka.
- Ka booqo CDC halkan <https://www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/index.html>
- Ka booqo FDA halkan <https://www.fda.gov/emergency-preparedness-and-response/mcm-legal-regulatory-and-policy-framework/emergency-use-authorization>.
- La xiriir waaxda caafimaadka dadweynaha ee gobolkaaga ama deegaankaaga

XAGGEE LAGU QORI DOONAA XOGTA TALLAALKAYGA?

Bixiyaha tallaalku wuxuu ku qori karaa macluumaadka tallaalkaaga Nidaamka Macluumaadka Tallaalka (IIS) ee maamulka gobolkaaga/degmadaada ama nidaam kale oo loogu talagalay. Tani waxay xaqiijin doontaa inaad hesho isla tallaalkaas marka aad u soo laabato qaadasho labaad. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan IISs booqo: <https://www.cdc.gov/vaccines/programs/iis/about.html>.

WAA MAXAY BARNAMIJKA TAAGEERADA MAGDHOWGA DHAAWACU?

Barnaamijka Taageerada Magdhowga Dhaawacu (CICP) waa barnamij federaali ah oo laga yaabo inuu bixiyo kharashaadka daryeelka caafimaad iyo kharashaadka kale ee gaarka ah ee qaar ka mid ah dadka sida daran ugu dhaawacma daawooyinka ama tallaallada qaarkood, oo uu ku jiro tallaalkani. Guud ahaan, sheegashada waa in loo gudbiyaa CICP hal (1) sanno gudahii laga bilaabo taariikhda tallaalka la qaatay. Si aad wax badan uga oggaato barnamijkan, booqo www.hrsa.gov/cicp/ ama wac 1-855-266-2427.

WAA MAXAY FASAXIDA ADEEGSIGA DEGDEGGA AHI (EUA)?

FDA-da Mareykanka ayaa fasaxday tallaalka COVID-19 ee Moderna iyadoo adeegsanaysa hanaanka helitaanka degdegga ah ee loo yaqaan EUA. EUA waxaa taageera bayaanka Xoghayaha Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha (HHS) ee dhigaya inay jiraan duruufo khasbaya adeegsiga degdegga ah ee daawooyinka iyo badeecooyinka bayoolojiga inta ay jirto aafadda COVID-19.

Tallaalka COVID-19 ee Moderna lama marin dib-u-eegis la mid ah tan la mariyo badeecadaha ay ansixisay ama aqbashay FDA. FDA ayaa soo saari karta EUA marka shuruudaha qaarkood la buuxiyo, kuwaas oo ay ku jiraan marka aysan jirin ikhtiyaaro kale oo wanaagssan, la aqbali karo


lana heli karo. Intaas waxaa dheer, go'aanka FDA wuxuu ku saleysan yahay caddeynta cilmiyeed ee dhameyska tiran lana heli karo ee muujineysa in badeecadu ay waxtar u yeelan karto ka hortagga COVID-19 inta ay jirto aafadda COVID-19 iyo in faa'iidooyinka la ogyahay iyo kuwa suurtagalka ah ee badeecadu ay ka badan yihiin khataraha la ogyahay iyo kuwa suurtagalka ah ee badeecada. Dhammaan shuruudahan waa in la buuxiyaa si loogu fasaxo badeecada in loo isticmaalo daaweynta bukaannada inta ay jirto aafadda COVID-19.

EUA-da loogu talagalay tallaalka COVID-19 ee Moderna wuxuu shaqeynayaa inta lagu gudajiro bayaanka COVID-19 EUA ee khasbaya adeegsiga degdegga ah ee badeecadan, ilaa la joojiyo ama laga noqdo mooyee (markaas oo wixii ka danbeeya aan badeecada la isicmaali karin?)

©2020 ModernaTX, Inc. Dhammaan xuquuqdu way dhowran tahay.

Liisan(ka/anda) xuquuqda: www.modernatx.com/patents

Waxa wax laga beddelay: 12/2020



Waxa wax laga beddelay: 12/20206